

Foomka Baaritaanka Maalinlaha ah ee Guriga ee loogu Talagalay in lagu Baaro Calaamadaha Fayraska Cudurka COVID-19 Baaritaan waxaa loogu talagalay shaqaalaha, ardayda iyo xubnaha qoyska

QAYBTA 1 – CALAAMADAHA CUDURKA: Ma isku aragtay calaamadahaan?

Calaamadaha inta badan lagu garto cudurkaan

- Qandho dhan 100.4 darajo Fahrenheit ama wax ka sareeya (fadlan hubi heerkulkaaga maalin kasta intaadan u aadin iskuulka)
- Qufac bilow ah ama qufac daran
- Neefsashada oo kugu adkaata
- Dhadhanka ama urta oo kaa luma

Waxyaabaha aan inta badan lagu garan cudurkaan

- Cune xanuun
- Lallabo
- Matag
- Shuban
- Qarqaryo
- Murqo xanuun
- Daal saaid ah
- Madax xanuun ama daran
- Neefta oo ciriiri kugu noqota ama sanko oo ku dareera

QAYBTA 2 – IN QOF KUU SOO DHAWAADO

In dadku isku soo dhawaado waxaa lagu qeexay inuu yahay dadka oo isku jirsada lix dhudun ama fuudh ama in ka yar muddo 15 daqiiqo ah.

- Miyaad u dhowaatay qof la xaqiijiyay inuu qabo cudurka COVID-19?
- Adiga ama xubin kale oo reerka ka mid ah oo leh waxyaabaha lagu garto cudurka COVID-19 oo hadda sugaya natiijooyinka baaritaanka cudurka COVID-19?
- Sarkaalka caafimaadka bulshada ama sarkaal caafimaad ma kuu sheegay inaad u baahan tahay go'doomin ama karantiil?

QAYBTA 3 - TALAABOYINKA XIGA

Ma u baahanahay inaan guriga joogo?

- Haddii aad isku aragtay HAL ama in ka badan oo ***Calaamadaha Inta Badan lagu Garto Cudurkan ee Qaybta 1 ee kore (qandho, qufac...), guriga joog.*** Xubnaha reerku sidoo kale waa inay guriga joogaan.
- Haddii aad leedahay LABA ama in ka badan oo ah ***Calaamada aan inta Badan lagu Garan Cudurkan (Cuno xanuun, lallabbo...), guriga joog.*** Xubnaha qoysku sidoo kale waa inay guriga joogaan.
- Haddii aad HAA kaga jawaabtay su'aal kasta oo ku jirta **QAYBTA 2, guriga joog.**

Yaan wacaa?

- Ardaydu waa inay wacaan dugsigooda si ay u soo sheegaan maqnaanshahooda.
- Shaqaaluhu waa inay wacaan maamulahooda/kormeerahooda, iyo sidoo kale inay wacaan Waaxda Shaqaalaha si ay u ogaadaan dukumiintiyada loo baahan yahay.
- Wac Isbitaalkaaga haddii aad u baahan tahay qiimeyn ama baaritaanka COVID-19.
- Telefoonka caawinta ee Hay'adda MDH COVID-19 wuxuu ka jawaabi karaa su'aalaha dadweynaha ee 651-297-1304, ama email ugu dir health.covid19@state.mn.us.**